Dhibbanuhu waa in uu kasoo muuqdo dhegaysiga ama amarka degdegga ah si toos ah ayaa faraha looga qaadayaa. Eedaysanaha loogama baahna in uu kasoo muuqdo dhegaysiga u dambeeya. Haddii eedaysanuhu aanu iman dhegaysiga maxkamaddu weli waxa ay soo saari kartaa amar RFA ah. Amarka u dambeeyaa ma dhaqan galayo illaa la gaadhsiiyo eedaysanaha.

Haddii kadib marka uu dhegaysto dhammaan cadaymaha uu qaadigu go'aansado in aanay meesha oollin caddeyn ku filan in la soo saaro amarka u dambeeya, amarka degdegga ahi waa uu dhammaan doonaa kiiskana waa la xidhi doonaa.

## Amarka Ilaalinta ee Gurmadka Xadgudubka ee Kama Dambaysta ah

Dhibbanaha iyo eedaysanaha labadaba waxa la siin doonaa nuqul amarka ah. Haddii eedaysanuhu aanu joogin dhegaysiga bilaysku waxa ay u geyn doonaan eedaysanaha nuqul. Haddii qaadigu uu soo saaro amarka u dambeeya waa in uu yahay mid loogu talagalay muddo wakhti ah oo cayiman.

Kahor inta aanu amarka u dambeeya wakhtigiisu dhicin dhibbanuhu waxa uu u xarayn karaa codsi qoraal ah maxkamadda si loo kordhiyo muddada amarka. Waraaqahan waxa laga heli karaa maxkamadaha, kooxda looyarrada maxalliga ah iyo barta www.vermontjudiciary.org.

## Jabinta Amarka U Dambeeya

Waa dembi in la jebiyo amar RFA ah. Haddii eedaysanuhu sameeyo wax uu amarku sheegayo in aanu sameyn karin, waa inaad wacdo fulinta sharciga; fulinta sharcigu waxa ay xidhi kartaa eedaysanaha.

**Lambarka aad u wacayso amarka RFA marka ay maxkamaduhu xidhan yihiin:**

**1-800-540-9990**

### Caawimo La Heli Karo

**Laynka Tooska ah ee Xadgudubka Guryaha**

**1-800-228-7395**

Waxa aad soo wici kartaa laynka tooska ah waxa aanad dalban kartaa lambarka taleefanka kooxda looyarrada xadgudubka guryaha ee maxalliga ah ama waxa aad booqan kartaa websaytkan https://vtnetwork.org/get-help/

Websaytka garsoorka:

**www.vermontjudiciary.org**

## Xareynta Amarka Gurmadka Xadguduba ee Maxkamadda Qoyska

Buug-yarahan waxa loogu talagalay in uu kaa caawiyo fahanka sida sharcigu u shaqeeyo amarrada Gurmadka Xadgudubka (RFA). Fadlan akhri buug-yarahan dhammaantii kahor inta aanad xarayn amar RFA ah. Qofka codsanaya amarka gurmadka xadgudubku waa "dhibbanaha". "Eedaysanuhu" waa qofka aad doonayso amarku in uu ka dhan noqdo. Uma baahnid inaad noqoto muwaadin si aad u xarayso codsi. Ma jiraan wax khidmad ama kharashaad xarayn ah.

Amarka RFA waa amar uu soo saaray qaaddi ku sugan maxkamadda qoyska si uu kaaga ilaaliyo adiga/ama carruurtaada eedaysanaha.

Buug-yarahani keliya waxa uu bixiyaa macluumaad xaddidan. Waxa laga yaabaa inaad doonayso inaad la hadasho looyar.

**Onlaynka Garsoorka Vermont**

www.vermontjudiciary.org

## Sida loo xareeyo Amar RFA ah:

Waxa aad xareyn kartaa amar RFA ah oo Degdeg ah ama Aan-Degdeg ahayn inta lagu gudo jiro saacadaha maxkamadda. Xareynta degdegga ah waxa la sameyn karaa wakhti walba oo kamid ah maalintii ama habeenkii.

Si aad u xarayso amar RFA ah waa inaad muujiso in eedaysanuhu yahay mid kamid ah kuwa soo socda:

- Xubin Qoys
- Xubin Guri
- Lammaane hadda ah ama hore
- Qof aad la noolayd
- Qof ay sheeko jaceyl idinka dhaxaysay
- Qof aad la lahayd xidhiidh galmeed ama kulan galmeed

*Haddii xidhiidhka aad la leedahay eedaysanuhu aanu ahayn mid kamid ah kuwa sare, waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad xarayso amarka Dabagalka ama Xadgudubka Galmeed. Waxa aad ka qaadan kartaa buug-yaraha Dabagalka ama Xadgudubka Galmeed maxkamadda ama www.vermontjudiciary.org.*

Sidoo kalena waa inaad muujisaa in:

- Eedaysanuhu uu jidh ahaan kuu dhibaateeyey
- Eedaysanuhu uu isku dayey in uu jidh ahaan ku dhibaateeyo
- Eedaysanuhu uu kugu riday cabsi ah dhibaato jidheed oo khatar ah
- Oo aadna ka baqayso in eedaysanuhu uu ku dhibaatayn doono, ama uu kugu ridi doono cabsi ah dhibaateyn jidheed oo khatar ah mustaqbalka

Waxa aad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka cabashada oo aad qorto bayaan qoraal ah oo aad ku dhaaratay. Qaadigu waxa uu dib u eegi doonaa xarayntaada isla maalinta la xareeyo. Isaga oo ku salaynaya xarayntaada, qaaddigu waxa uu ogolaan doonaa ama diidi doonaa codsigaaga Amarka RFA ee Degdegga ah.

## Haddii codsigaaga Amarka Degdegga ah La Diido

Waxa aad codsan kartaa dhegaysi xarayntaada ah oo ugu dambeeya. Waxa aad fursad u heli doontaa inaad marag ka furto maxkamadda dhexdeeda si aad u caddayso kiiskaaga. Haddii aad codsato dhegaysi, markaa ogaysiiska cabashadaada, bayaankaaga qoraalka ah iyo dhegaysigaaga waxa loo diri doonaa fulinta sharciga. Fulinta sharcigu dabadeed waxa ay eedaysanaha gacanta uga dhiibi doonaan waraaqaha. Haddii aad go'aansato inaanad codsan dhegaysi kama dambays ah, cabashadaada iyo bayaankaaga qoraalka ah waxa laga dhigi doonaa qarsoodi eedaysanuhuna weligii awood u yeelan maayo in uu helo nuqul ah waraaqaha degdegga ah ee aad xaraysay.

## Haddii Amarkaaga Degdegga ah La Ogolaado

Amarka degdegga ah ee uu soo saaray qaaddigu keliya waa amar ku meelgaadh ah, waxa uu ahaanayaa dhaqangal illaa laga gaadhayo dhegaysigaaga kama dambaysta ah. Dhegaysiga kama dambeysta ah waxa lagu muddeyn doonaa toban maalin ganacsiyeed gudahood oo ka bilaabmaya xareyntaada. Marka lagu gudo jiro dhegaysiga, adiga iyo eedaysanuhu waxa aad awood u yeelan doontaan inaad u sheegtaan qaaddiga wixii dhacay oo aad keentaan markhaatiyo si ay u marag furaan.

Qaaddigu waxa uu amar ku bixin karaa mid kamid ah kuwa soo socda iyaga oo ah ku meelgaadh:

- Eedaysanuhu in uu ka joogsado in uu kugu xadgudbo adiga iyo/ama carruurtaada
- Eedaysanuhu in uu ka joogsado in uu ku dhibaateeyo adiga iyo/ama carruurtaada
- Eedaysanuhu in uu masaafad cayiman kaa fogaado adiga, carruurtaada, gurigaaga, goobta shaqadaada, gaadhigaaga
- Eedaysanuhu inaanu kula soo xidhiidhin adiga ama keliya loo ogolaado noocyo cayiman oo xidhiidh ah
- Eedaysanuhu in uu si ku meelgaadh ah uga baxo gurigaaga
- Adigu inaad masuuliyadda carruurta hayso si ku meelgaadh ah

**Maxkamaddu waxa ay u diri doontaa nuqul ah cabashadaada, bayaanka qoraalka ah iyo amarka ku meelgaadhka ah, oo ay la socdaan taariikhda dhegaysigu, fulinta sharciga waxaanay siin doonaan nuqul eedaysanaha.** Illaa iyo inta fulinta sharcigu ay gudbinayso waraaqaha amarka ku meelgaadhka ahi ma aha mid dhaqan galaya.

Hubi inaad ka hesho nuqul amarkaaga ah maxkamadda. Taariikhda iyo wakhtiga dhegaysigaagu waxa ay ku qoran yihiin bogga labaad ee amarka.

## Waxa ay Tahay in Laga Fisho Dhegaysiga Kama Dambaysta ah

Inta lagu gudo jiro dhegaysiga RFA ee kama dambeysta ah dhibbanaha iyo eedaysanaha labaduba waxa ay heli doonaan fursad ay markhaati ku furaan. Sidoo kale, labadooduba waxa ay keeni karaan markhaatiyo si ay marag u furaan. Dhibbanuhu waxa uu dalban karaa amarka in la ogolaado muddo wakhti ah oo cayiman.

3/2021